




HALBEEGYADA (HEERARKA) QARAN ee akhriska, qorista iyo xisaabta

Ilaa xad intee ayuu ilmahaygu
ku wanaagsan yahay
iskuulka?



Waa maxay Halbeegyada (Heerarka) Qaran (National Standards)?

Laga bilaabo sannadkan 2010ka, dhammaan dugsiyada ay dhigtaan ilmaha ku jira Years 1–8 waxay isticmaali doonaan National Standards-ka akhriska, qorista iyo xisaabta.

Halbeegyada waxaa dejiyey Ministry of Education iyo khubaro ku takhasusay maaddooyinka. Halbeegyadu waxay sharxayaan heerka laga doonayo ardada afkooda hooyo Ingiriiska yahay inay ka gaadhaan akhriska, qorista iyo xisaabta Years 1–8.

Haddaanu afka Ingiriisku ahayn luuqadda koowaad ee ilmahaaga

Haddii ilmahaagu yahay mid hadda uun af-Ingiriiska baranaya, iskuulku waxaa suurtoowda inuu go'aansado inay habboon tahay in warbixinta lagu soo dirayo labada ama saddexda sano ee hore loo isticmaalo The English Language Learning Progressions.

Iskuulkaagu wuxuu warbixin kaa siin doonaa horumarka cunugaaga iyo dadaalkiisa la xiriira Halbeegyada Qaran ee Akhriska, Qorista iyo Xisaabta. Si laguugu sheego horumarka cunugaaga ee barashada Af-Ingiriiska oo ah luuqad dheeraad ah, waxaa sidoo kale laga yaabaa in iskuulku go'aansado in warbixinta lagu soo dirayo lagu saleeyo Manhajka Barashada Luuqada Ingiriiska (English Language Learning Progressions).

Manhajku wuxuu sharraxaad ka bixinayaa heerka akhriska, qorista, kuhadalka iyo dhegeysiga ee laga doonayo carruurta barashada Af-Ingiriisku ku cusub tahay. Wuxuu sidoo kale macallinka ilmahaaga ka caawinayaa diyaarinta barnaamijka barista iyo barashada ee ku haboon inuu cunugaaga ka caawiyo barashada Af-Ingiriiska.

Maxaa loosoo bandhigay?

Halbeegyadu waxay macallimiinta, ilmahaaga iyo adigaba siinayaan aragti cad oo ku saabsan ilaa heerka ilmahaagu ku wanaagsan yahay akhriska, qorista iyo xisaabta, iyo wixii looga baahan yahay inuu ka yeelo mustaqbalkiisa waxbarasho.

Inuu ku wanaagsan yahay akhriska, qorista iyo xisaabta waxay ilmahaaga siin doontaa xirfadaha iyo aqoonta uu hadda u baahan yahay. Inuu gaadho heerka laga doonayo ee halbeegyada ama kaba sarreeyo intuu ku jiro fasallada 1-8 waxaa macneheedu yahay in ilmahaagu hayo wadadii uu ku gaadhi lahaa aqoonsi waxbarasho oo muhiim ah markuu dugsiga sare dhammeeyo – NCEA level 2 ama wax u dhigma.

Halbeegyada akhriska, qorista iyo xisaabta waxay macallinmiintu u isticmaalaan:

- inay qorsheeyaan oo baraan waxa ilmahaagu u baahan yahay si uu u barto akhriska, qorista iyo xisaabta ee dhammaan maaddooyinka manhajka waxbarasho
- inay qiyaasaan ilaa heerka ilmahaagu waxbarashada ku wanaagsan yahay
- inay dejiyaan qorshaha xiga ee waxbarashada ilmahaaga iyo inay sameeyaan hadafyo waxbarasho oo adiga iyo ilmahaagaba laga talo gelinayo
- inay ugu yaraan laba jeer sannadkii kuu soo diraan warbixin la fahmi karo oo ku saabsan horumarka waxbarasho ee ilmahaagu samaynayo iyadoo taas looga qiyaas qaadanayo halbeegyada.

Ma hal imtixaan oo qaran ayaa jira?

Maya.

Sidee macallinku ku xaqiijinayaa ilaa heerka ilmahaagu ku wanaagsan yahay waxbarashadiisa?

Macallinku wuxuu adeegsan doonaa habab badan oo kala duwan si uu u ogaado ilaa xad heerka ilmahaagu ku wanaagsan yahay akhriska, qorista iyo xisaabta. Kuwaas waxaa ka mid ah:

- isticmaalka imtixaanno/qiimayn rasmi ah
- ufiirsasho ilmahaaga markuu qabanayo hawshiisa fasalka gudihiisa
- inuu kala hadlo ilmahaaga waxbarashadiisa
- ilmahaaga oo qiimayn ku sameeya waxqabadkiisa, iyo carruurta oo dhammaan qaarba qaarka kale hawshooda qiimayn kusameeyo.

Carruurta qaarkood waxay u baahan doonaan waqti dheeraad ah iyo gacan qabasho si ay ugu hawl galaan gaadhista heerka la rabo. Macallinku wuxuu kala shaqaynayaa adiga iyo ilmahaaga sidii ilmahaaga looga caawin lahaa inuu ka libkeeno himilooyinkiisa waxbarasho ee xiga.



Lashaqaynta macallinka ilmahaaga

Door muhiim ah ayaad ku leedahay waxbarashada ilmahaaga.

Xidhiidh wanaagsan oo aad la yeelato macallinka ilmahaaga, adigoo si cad u fahmaya ilaa heerka ilmahaagu waxbarashada ku fiican yahay, isla markaana kala shaqaynaya taakulaynta waxbarashada, waxay ilmahaaga ka caawinaysaa inuu sameeyo dadaalka ugu habboon.

Su'aalaha aad macallinka weydiin kartid

- Ilaa xad heerkee ayuu ilmahaygu waxbarashada ku wanaagsan yahay?
- Muxuu si wanaagsan u qaban karaa?
- Muxuu u baahan yahay in laga caawiyo?
- Maxaa xiga oo uu baran doonaa?
- Maxaad u baahan tahay inaad ka ogaato ilmahayga si aad fasalka dhexdiisa ugu caawiso?
- Sidee iskuulku u caawin doonaa ilmahayga?
- Maxaan qaban karaa si aan ilmahayga uga caawiyo inuu guriga wax ku barto?
- Waa maxay sida ugu wanaagsan ee aan u wada xidhiidhi karno si aan ula socdo dadaalka waxbarasho ee ilmahayga?

Ma doonaysaa inaad wax badan ka ogaato National Standards ama warbixinta?

- La hadal macallimiinta ilmahaaga
- Booqo bogga Internetka ee waalidiinta Ministry of Education dabadeedna riix National Standards – **www.minedu.govt.nz/Parents**
Waxaa kaloo boggan kujira akhbaar ku saabsan:
 - barashada af Ingiriiska ka luuqad labaad ahaan
 - carruurta leh naafonimo waxbarashadooda saamayn ku leh
- Ka akhriso halbeegyada – **www.nzcurriculum.tki.org.nz/National-Standards**



Copies of this leaflet (item number 700083) are free to order from **www.thechair.minedu.govt.nz** or by email: **orders@thechair.minedu.govt.nz**

The leaflet is also available in: Afrikaans (700091), Arabic (700090), Chinese (700088), Cook Islands Māori (700089), Dari (700086), English (700012), French (700087), Hindi (700084), Korean (700085), Niue (700094), Samoan (700082), Tagalog (700081), Thai (700095), Tokelau (700092), Tongan (700093).